MINNESOTA
OFFICE OF OMBUDSMAN
FOR MENTAL HEALTH AND
DEVELOPMENTAL DISABILITIES

121 7th Place East, Suite 420, Metro Square Building
Saint Paul, Minnesota 55101

Cod: 651-757-1800
Khadka Bilaashka ah: 800-657-3506
Fakis: 651-797-1950
TTY/Cod: Adeega Minnesota Relay Service 711
https://mn.gov/omhdd

"Cod Siinta Kuwa Marar Dhif ah uun La Maqlo"

Nidaamka Ku Xukminta Daawaynta Madaniga ah ee Loogu Talagalay: Dembiilayaasha Galmada

1) Baaritaanka Codsiga ka Horeeya iyo Codsiga

A. Qof kasta oo danaynaya ayaa wuxuu ka dalban karaa degmada inay bilowdo dacwadaha ku xukminta daawaynta. Waxaad ku jiri kartaa xabsi ama meel bulshada dhexdeeda ah. Kahor intaysan bilaabanin dacwadaha ku xukminta daawayntu, xaqiiqooyinka waxaa marka hore loo soo gudbinayaa qareenka degmada, kaas oo, haddii uu ku qanco in ay sabab wanaagsan jirto, diyaarin doona codsiga. Qareenka degmadu wuxuu codsan **karaa** warbixinta baaritaanka codsiga kahor, laakiin si ka duwan noocyada kale ee xukminta daawaynta, baaritaanka codsiga ka horreeya **looma** baahna dadka loogu xukumay daawaynta dambi galmo dartii.

B. Haddii qareenka degmadu go'aansado in la sameeyo baaritaanka codsiga kahor, koox baaritaanka ayaa la dhisi doonaa.

C. Kooxda baaritaanka codsiga kahoreeya ayaa waxay dib u eegaan kiiska waxayna talo u soo jeediyaan qareenka degmada. Tani waxay ka koobnaan doontaa:
   1. waraysi shaqsiyeed ah oo adiga lagaa qaado (shaqsi ahaan in loo wada joogo ayaa la doorbidaa);
   2. baaritaanka habdhaqanka lagugu eedeeyay ee u baahan xukunka daawaynta;
   3. indhaynta fursadaha xaddidnaanta yar ee la qaadan karo halka lagugu xukmin lahaa daawaynta, iyo
   4. dad kale ka soo ururinta macluumaadka.

D. Wax kasta oo aad u sheegto qofka baaritaanka samaynaya waa lagu dari karaa codsiga sidoo kalena waxaa loo isticmaali karaa dhagaysiga.

E. Kooxda baaritaanka ayaa ku talin doonta in lagu sii socdo go'aanka xukminta ama inkale.

F. Kadib marka la helo talo bixinta, qareenka degmada ayaa go'aan ka gaari doona in codsi loo xarayn doono xukminta daawaynta iyo inkale. Haddii qareenka degmadu rumaysan yahay inaad ku habboontahay qeexitaanka "khsiyada jirrada galmo" ama "qof halis ah galmo ahaan" sida lagu qeexay MN Statute § 253D.02, codsi ayaa la xarayn doonaa.

G. Codsiga waxaa laga xareeyaa degmada qaadaysa mas'uuliyada maaliyadeed ama degmada halka bukaanku uu joogo. Haddii aad ku jirto xabsiga koomishineerka, codsiga waxaa laga xarayn karaa maxkamada halka xukunku ka dhacay.

2) Dhageysiga xukminta

A. Haddii codsi la xareeyay, maxkamada ayaa magacaabi doonta Baaraha Maxkamada si uu kuu baaro iyo sidoo kale inuu dib u eego taariikhdaada iyo diiwaankaaga. Mar haddii codsi la xareeyay, waxaad leedahay xuquuqo gaar ah, oo ay kujirto xaquuqda qareen bilaash oo ay maxkamadu kuu magacowday, xaq u lahaanshaha inaad codsato Baare Maxkamadeed oo labaad, xaqa aad u leedahay inaad kaqaybgasho dhagaysiga dacwadaha, iyo inaad xaq u leedahay inaad diido hab socodka dacwada iyo inaad soo bandhigto iyo in aad ka keento caddaynta.

B. Dhagaysiga xukunka waa in lagu qabto 90 maalmood gudahood marka codsiga la xareeyo. Waxaa laga yaabaa in la kordhiyo sabab macquul ah dartood illaa 30 maalmood oo dheeraad ah.
C. Warbixinta Baaraha Maxkamada waa in la xareeyo 48 saacadood dhagaysiga ka hor. Haddii maxkamadu kugu hesho inaad tahay qof galmo ahaan halis ah ama in aad qabto shakhsiyada jirrada galmo, maxkamada ayaa kugu xukumi doonta Barnaamijka Dembiilaha Galmada ee Minnesota (MSOP).
D. Qareenkaaga ayaa leh culayska sharci ee inuu ugu caddeeyo maxkamada si cad oo qancin leh in goob xanibaad yar ay diyaar u tahay daawayntaada dembiilaha galmada haddii xukminta daawaynta aan loo samaynin MSOP. Doorashadan ikhtiyaarka xanibaada yar waa inay waafaqsanyihiin baahiyahaaga daawaynta iyo shuruudaha looga baahan yahay nabadgalyada bulshada.
E. MSOP waa hal barnaamij oo leh laba xarumood: Moose Lake iyo St. Peter. Dhamaan macaamiishu waxay ku bilaabaan daawaynta xarunta MSOP ee Moose Lake waxaana loo wareejin karaa xarunta St. Peter si loo dhamaystiro daawaynta oo ay u bilaabaan ka shaqaynta siidaynta ku meel gaarka ah.

3) Marka Lagu Xukumo Kadib

Haddii maxkamadu kugu hesho inaad tahay qof galmo ahaan halis ah ama in aad qabto shakhsiyada jirrada galmo, maxkamada ayaa kugu xukumi doonta daawaynta wakhti aan la cayimin. Kaliya Guddiga Dib u eegista Gaarka ah ayaa dhagaysan kara codsiyada ku saabsan beddelidda xaaladda halkaa wixii ka dambeeya.

4) Qiimaha Kharashka Daryeelka

Haddii lagugu xukumay xarunta daaweynta dowlada, waxaa lagugu soo dallaci karaa dhammaan ama qayb ka mid ah kharashka daryeelka. Inta aad nooshahay, tani waxay ahaan doontaa hadba inta aad bixin karto. Dhimashadaada ka dib, gobolku wuxuu xaq u leeyahay inuu xareeyo dacwad ka dhan ah hantidaada oo laga rabo wadarta kharashka.

Waa dhaqanka hadda ee Waaxda Adeegyada Aadanaha inay kaa goostaan qayb ka mid ah mushaharkaaga shaqo ee aad kasbatay intii aad ku jirtay daawaynta si ay ugu bixiso kharashka daryeelkaaga.

5) Saamaynta Sharciga ee Xukunka

A. Qofka lagu xikmiyey in inuu yahay qof galmo ahaan halis ah ama qof qaba shakhsiyada jirrada galmo ayaa waxay saamayn ku yeelan kartaa rukhsadaha/shattiyada xirfadeed ama shaqsiyeed. Kala xiriir hay'ada ama guddiga bixiya shattigaaga wixii macluumaad dheeraad ah.
B. Diiwaanka maxkamada ee ku saabsan xukminta madaniga ah waxaa loo tixgeliyaa in ay tahay macluumaad dadweyne. Qaybo ka mid ah faylka waxaa laga yaabaa in la qariyo, laakiin xaqiiqda ah in laguugu xukumay daawayntu waa macluumaad dadwaynaha u furan.

6) Ku Xukminta Daawaynta Madaniga Ah Ee Loogu Talagalay Dambiilayaasha Galmadu Waxay Leeyihiin Laba Ujeedo oo Waaweyn

A. Si loo siiyo adeegyo shaqsiyaadka maxkamadu ay ku xukuntay inay helaan daawaynta dembiilaha galmada iyadoo ujeedadu tahay in la yareeyo heerka dib ugu noqoshada dambiga, iyo
B. Si looga ilaaliyo dadwaynaha sababaha dembiyada galmada.

Bayaanka ADA: Haddii aad naafonimo leedahay oo aad rabto ogaysiiskan oo qaab kale ah waxaad ka dalban kartaa degmada. Macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan oo ku saabsan habka ku xukunka daawaynta, la xiriir Xafiiska sarkaalka baara cabashada shacabka ee Caafimaadka Dhimirka iyo Naafonimada Korriinka, 121 7th Place E., Suite 420 Metro Square Bldg, St. Paul, Minnesota 55101, https://mn.gov/omhdd/ Cod: 651-757-1800 ama Khadka Bilaashka ah: 1-800-657-3506.